# HAB-RAACA TILMAAMA CODSADEYAASHA MAGANGELYADDA CAALAMIGA EE TALYAANIGA



MINISTERO DELL'INTERNO

Guddiga Qaranka ee Xaquuqda Magangelyo doonka

# TUSMOOYINKA

1. Ujeedada tilmaantaan....................................4

2. Codsida magangelyadda caalamiga ah............6

3. Xaquuqda iyo wajiibaadka codsadaha magangelyo doonka ah....................................17

4. Soo dhaweeynta....................................20

5. Qiimaynta codsiga iyo natiijooyinka ka soo bixi kara....................................23

6. Xaquuqdaada iyo wajiibaadka kadib markii laguu aqoonsado magangelyo..............33

7. Nocyaal kale oo dal ku joog ah....................37

8. Cinwaanadda iyo lambarro muhiin ah............39

# 1. Maxay tahay tilmaantaan ?

Haddi hab-raaca tilmaama ah uu gacantada ku jiro **waxaa joogtaa Talyaaniga** waxaad codsatay ama ku tala jirtaa in aad codsatid Magangelyo caalami ah.

Tilmaantaan waxaad ka heleysaa wargelino ku sahlaaya **sida loo galo nidaamka** Magangelyo caalami ah, iyo sharuudaha **qiimaynaaya** codsigaaga iyo waxii **xaquuq iyo wajibaad ah**.

U akhri si taxader leh, keydso, markastana ka baaro maclumaadka aad uga baahan kartid. Waxuu kaa cawinayaa in aad garatid xaaladaha dhacaaya inta aad ku jirtid nidaankan.

Haddi ay jiraan qaybo ka tirsan oo aadan fahmin, waxaad weydisaa in lagu micneeyo si qoto dheer hawlwadeenada sharciga jooga xarunta soo dhaweeynta ama ururada difaac oo ku sugan deggankaada. Dhammadka tilmaamahaan waxaad ka heli kartaa tixraacyo waxtar kuu noqon kara.



Jadwalkaan waxuu soo koobaya 6 marxaladood oo nidaam uu ah aqoonsiga Magangelyadda caalamiga ah. Waxaad ka helaysaa warbaxin dheerad ah inta aad wado akhrinta tilmaamahaan.

1

**Muujinta rabitaanka in aad codsato magangelyo caalami ah .**

Marka hore waxay ka kooban tahay in sida ugu dhaqsiyaha badan in aad tagto una sheegto Hay'adda Nabadsugidda iyo Booliska xaduudaha in aad rabto in aad codsato magangelyo caalami ah.

2

**Aqoonsiga**

Waa hawl galka Booliska ku diwaangelinaayo (magacaada, ina ayahaaga, meesha iyo taarikhda aad ku dhalatay, jinsiyadaada), sawir ayaa laga qaadayaa iyo raadka faraha.

3

**Hanaanka codsiga**

waxay ku saleeysantahay isku duwidda foomka is qoridda codsashadda magangelyadda caalamiga ah.

4

**Wareeysiga Guddiga Kominshiinka Degganka**

Waa wareeysi lagaa wareeysanayoo xaaladihii iyo nolashii aad soo martay iyo baqdinta aad ka qabtid haddi ay dhacdo in dib lagugu celiyo wadankaada

5

**Qiimeynta iyo Go'aanka**

Waa marxaladda uu Guddigga Kominshiinka dhulaalka uu qiimeynaayo go'aana ka gaarayo codsigaada magangelyadda Caalamiga ah.

6

**Racfaan**

Marxaladaan waxaad fursad uu leedahay in aad garsoore u tagtid racfaan ka qaadato go'aanka ka dhanka ah Guddiga Komishiinka dhulalka.

# 2. Codsiga magangelyadda caalamiga ah

## Maxay tahay Magangelyadda Caalamiga ah ?

Magangelyadda caalamiga ah waa hab asaasi u ah xaquuqda waxuuna ka mid yahay kuwa laga aqoonsayahay Talyaaniga oo daryeela **Qaxootiga** iyo kuwa haysto **aqoonsiga magangelyadda kalmada**.

Qaxootiga waa dad qaba cabsi in lagu cadaadiyo waddanka ay asal ahaan ka soo jeedan sababo xagga isirkooda, diintoda, jinsiyadooda, fikirkooda siyaasadeed ama bulsho ahaan ay ka tirsan yihiin koox aan ka helin daryeel waddanka ay ka soo jeedan. Firi bogga 26 wargelin dheerad ah.

Kooxda Heysata aqoonsi kalmo waa dad ayagoo qaxooti aheyn, dhab ahaan waxay halis ugu jiraaan in ay kala kulmaan dhib halis ah waddanka ay ka soo jeedan (xukun dil toogasho , jirdil, kula dhaqan ficil aan bani'aadnimo ahayn, bahdil, ama khatar dhimasho dagaal awgiis.

Magangelyadda caalamiga ah ugu horreyn waxay sugaysaa xaquuqda ah in aan dib lagu celin karin, oo aad joogi karto dalka Taryaaniga.

## Ma codsan karaa magangelyo caalami ah ?

- Haddadan ahayn muwaadin Ururka Yurub oo aadan ku laban karin waddanka aad ka soo jeeday sababto ah waxaad ka cabsi qabtaa in lagu cadaadiyo ama u kuu soo gaaro dhib culus.
- Haddadan haysan wax dhalasho ah oo aad ka cabsi qabtid cadaadis ama dhib culus ku soo gaaro hadii aad ku laabatid waddankii aad caadi ahaan u degganeyd.

*Hadaad u maleynaysid in xaaladaada ay ka duwan tahay kuwa kor lagu xusay, isla markaana aad u bahantahay in aad ku sugnaatid dalka Talyaaniga sababo kale awgood, codso in lagugu wargeliyo noocyada kale ee dal ku jooga ah adigoo la kaashanaaya sharci yaqaan.* *Fiiri bogga 37.*

## Goorma iyo meeshe aan ku soo gudbi karaa codsigayga Magangalyadda caalamiga ah ?

Soo gudbi codsigaaga **sida ugu dhaqsiyaha badan**.

Waad soo gudbin kartaa in aad doonaysid magangelyo caalami ah markaad timatid dalka Talyaaniga, tag rugta **Booliska Xaduudaha**, ama haddii Italiya aad hore u joogtay tag **xaruunta Booliska** - Xafiiska Socdaalka Booliska midka kuugu dhow.

Hadaad xabsi ku jirto ama lagugu hayo xarunta ay joogaan laguna hayo dadka dib loo celinaayo, waad dalban kartaa codsi magangelyo caalami ah.

Codsiyada waa **shaqsi**: qof walba oo qaan gaar ah waa inay shaqsi ahaan u soo gudbiyaan codsigooda. Haddii aad leedahay carruur yaryr oo jooga Talyaaniga fadlan ogeysii Maamulada joogitaankooda, qaabkan codsigaaga sidoo ayaa sax iyaga u noqoya. Haddii aad ka yar tahay da'da 18 sano oo aad kaligaa halkaan Talyaaniga ku tahay waxaad weli codsan kartaa ilaalinta caalamiga oo leh caawinta kormeere ka socdaa xarunta aad joogto.

## Lacag inaan bixiya miyaa?

MAYA

Nidaamka iyo qiimaynta codsiga magangelyadda caalamiga ah waa lacag la'aan.

Maamuladda Talyaaniga marna kuma weydinayaan lacag si aad u dalbatid ama lagu qiimeeyo codsigaada Magangelyadda calamiga ah. Haddi cid kuu sheegto ama ku fahamsiiyo in lacag la iska rabo, wargeli maamuladda.

# Waddankee qiimeyn doona codsigayga magangelyadda caalamiga ah ?

Waddanka qiimeyn doona codsigaaga magangelyadda caalamiga ah waxaay ku kheexan tahay Xeerka Dublin.

**Xeerka Dublin** waa sharci u degsan Midowga Yurub, kuwaas oo ka kooban xeerarka lagu go'aaminaayo waddanka awooda u leh in uu baaro codsigaada, xaqiiq ahaan waddanka Midowga Yurub oo aad codsiga u gudbisay ma la hubo in uu ahaan doono midka qiimayn doona codsigaada.

Waddanka Midowga Yurub oo aad joogtid, ka hor inta uu baarin codsigada magangelyada caalamiga ah ee aad soo gudbisay, waxuu xaqiijinayaa in uu awood uu leeyahay in uu fuliyo codsigaada, ama in uu kugu wareejiyo waddan ka mid ah UruurkaYurub oo baari doono codsigaada. Sidaad u ogaatid waa kuwee32 dal ee Yurub oo isticmaala Xeerka Dublin fiiri qariidada bogga 11.

Xeerka Dublin waxuu leedahay sababo kala duwan , oo waddan ayaga ma mid ah qaas ahaan uu baari karo codsi magangelyo caalami ah : haddi xubin qoyskada ka mid ah joogan waddamadaan xeerkaan wadaaga; haddi aad haysatay fiiso dal ku gal ama sharciga ogoonlashaha joogista ka soo baxday waddamadaan isticmaala xeerkaan; haddi sii sharci ah ama sharci darro ah aad soo martay waddamadaan qaarkood. Sharciga loo adeegsado waa : **waddanka qiimeyn kara codsigaaga magangelyo doonka ah waa waddanka ugu horeeyay ee aad ka soo gashay Yurub.** (tusaale: Haddi Italiya ay ahead waddankii ugu horeeyay oo Yurub aad ka soo gashay, Talyaaniga aya qiimeyn donna codsigaada magangelyo doonka ah.

Haddi aad qaraabo kuu joogto waddan ku jira midowda Yurub oo aad rabtid inaad iyaga ku biirtid, la hadal shaqaalaha xeradda soo dhaweeynka aad ku jirtid, ama sharci yaqaan ama si toos ah Booliska.

Waxaad suubin doonta wareeysi qarsoon oo ay kula yeelan doonan saraakiisha Booliska luuqadaada ama luuqad aad fahmi karto, waa muhiim in aad ka hadasho maclumaadkaada nooc kasto oo muhiim ku ah, si gaar ah haddii ay jiraan qaraabadaada joogta waddama kale ee Yurub (UE), soo saar haddi aad haysatid wax dokumenti ah.
Wareeysigaan ma aha midka go'aanka codsigaada magangelyadda caalamiga

ahaa ee waa siddi loo go'aami lahaa waddanka qiimayn doona codsigaada. Codsigaada waxaa lagu baari doona xafiiska Wasaradda Arrimaha Guddaha ee la yirahdo Qaybta Dublin.

Waxaad si sharci ah ugu darman karta familkaada waddanka ay joogan, oo waddankaas xaaladaada ka sii wadan kartaa sida ku cad kisaaskaan soo socda :

- Haddi aad qaan gaar tahay waad u tagi kartaa **carrurtada yar-yar, ninkaada** ama **naagtada** (xaaladaha qaarkood lammanahaada), **haddi ay qaxooti yihiin, ama ay haystan aqoonsiga kalmada ama yihiin codsade magangelyo doon** waad ugu tagi kartaa waddanka ay joogaan.

- Haddi ay jirto in aad tahay **qof uur leh, ama mar dhow umushay,cudur hails ah qabto,naafo aad u liita ah, ama da' weyn,** waad ku darman kartaa ilmahaaga, walaalahaadda, ama waalidkaada haddi aad u **daryeelaysid** ama adiga aad tahay ruux **daryeel uu baahan**.

- Ka hor intaadan soo galin Talyaaniga, waxaad waddan kale oo Yurub ka mid ah u soo bandhigatay codsi magangelyo, sidaa ku qeexan Xeerka Dublin waddanka aad codsiga u bandhigatay ayaa baari karo codsigaada. Haddi lagu siiyo diidmo,waxaa racfaan ka qaadan kartaa masuulinta garsoorka ee isla waddankaas si loo xaqiijiyo in go'aankaas uu cadaalad ahaa.

- Haddi intaadan tagin waddan kale oo Yurub ah aad codsi u soo gudbisay waddanka Talyaaniga, sidaa ku qeexaan Xeerka Dublin waxay noqon doonta Talyaaniga waddanka awooda u leh baaritaanka codsigaada iyo magangelyaada caalamiga ah. Haddi aad ka tagtid ama ka tanaasushid codsigaadii aad ku soo bandhigatay Talyaaniga, wax isbadal ah kuma imaanaayo waddanka awooda u leh baaritaanka xaaladaada.

Xasuusnow, haddi aadan raali ka aheeyn go'aan ka soo baxay waddan ka mid ah Midowga Yurub oo ah in lagugu wareejiyo waddan kale oo awood u leh baaritaanka codsigaga, waxaa xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadato garsoore sharci.Haddi aadan haysan qarash kugu filan waxaad xaq uu leedahay in lagu cawino adigoo lagac bixin.

# Haddi aad tahay caruur da' yar oo waalid la socoonin.

Haddi aad tahay **caruur da' yar oo waalid kula soconin laakiin aad ku leedahay qaraabo waddan kale oo Yurub ah, ha isku dayin in aad kaligaa safarto ha ka tagin xeradda soo dhaweeynta oo add ku nooshahay.**

Ogeysii hawlwadeenada xeradda aad ku jirtid, ama qofka masuulka kaa ah, ama Booliska in aad rabto in aad ku darsanto eheladaada.
Waxaad ku safari kartaa Dokumenti si nabad iyo aamin ah, si sharci ah ugu tagi kartaa **hooyadaa** ama **aabaha** ama qof kale oo sharci ahaan **kifaala qaaday**, ama **walaalka** ama **walaasha** ama **eedo/adeer/abti/habaryar** ama **awoowe/ayeeyo** oo ku daryeeli karo.

Qaraabada aad u tageeysid waa inay leeyihin sharci degganaasho waddanka ay ku noolyihiin. Sidoo kale haddi aad tahay caruur da'yar oo lala socoonin, codsigaada waxaa lagu baarayaa waddanka aad joogtid.

## Digniin


- Haddi waddanka qiimeyn lahaa codsigaada uu yahay Talyaaniga, laakiin aad ka safartid oo weydisatid magangelyo caalami waddan kale oo ka mid ah Midowga Yurub, waxaa lagugu soo cellin karaa Talyaaniga.

- Ka hor intadaan imaan Talyaaniga waxaad gashay waddan ka mid ah Yurub oo ku jira Xeerka Dublin, waxaa lagugu wareejin kara waddankaas.

*Waxii macluumad dheerah ah weeydiso caawinaad sharci yaqaanka jooga xeradda aad martida ku tahay ama urruradda daryeela magangelyo doonka ama qareenkaada.*

# Waa kuwee waddanada isticmaala Xeerka Dublin?

Waa 28 waddan oo xubin ka ah Midowga Yurub ( Austria, Belgium, Bulgaria, Cyprus, Croatia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Ireland , ITALY, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Polan, Portugal, The United Kingdon, The Czech Republic, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden, Hungary) intaa waxaa sii dheer Switzerland, Norway, Iceland iyo Liechtenstein.



# Waa maxay qabka aad uu soo gudbin kartid Codsi magangelyo

**1) AQOONSIGA**: kadib markaad sheegto in aad rabtid in aad weydisato magangelyo calami ah, Booliska waxuu ka qaadayaa xogta shaqsi (magaca, magaca aabe, taarikhda aad dhalatay,meesha aad ku dhalatay,jinsiyadaaada,) iyo sawwiro. Haddi da'aada **la mid tahay ama ka badan tahay 14 jir**, waxaa kale oo laga qaadayaa sawirka faraha(finger print) oo loo gudbin doono kayda xogta Yurub ee raadadka faraha oo lagu magacaabo Eurodac. Siddi loo fuliyo hawlahaan waxaa lagugu hayn doona hoy gaar u ah muddo 1 bil ah .Markuu waqtigaan dhammado oo weli aan la sugin aqoonsigada ama jinsiyadaada waxaa laguu wareejin kara **Xarunta joogtada iyo dib-u-celinta**, meeshaas oo lagugu hayn karo ugu badnaan **6 bilood**.

**2) SHARCIYEENTA CODSIGA** : waa buuxinta foom la yiraahdo **C3**. Booliska waxuu ku weydinaa su'aalo aqoonsi iyo xaaladaada shaqsi (tusaale: magacada, magaca aabe, mesha aad ku dhalatay, markad dhalatay, jinsiyadaada, meshaa markaan aad deggan tahay iyo cinwaanka lagala soo xariiri karo, haddi aad leedahay shahaado wax barasho, shahaado shaqo, diintaada, meeshaad deggan ku leedahay, luqadaha aad taqaanid), familkaada/qoyskaaga, safarkii aad soo martay, waxaa lagu weydinaaya si kooban in aad ka sheekaysid sababta kaa soo waaday waddankaagi iyo sababta aad dib ugu laaban karin. Haddi add rabtid waxaad ku dhiibi kartaa maclumaadkaada ayagoo qoral ah (ku qoran luqadda Talyaaniga ama luuqado kale), adigoo sharaxaayo sheekada. Haddi aadan ku hadlin luuqadda talyaaniga waxaa xaq uu leedahay **Tarjumaan**.

Haddi aad haysato baasaboor waa inaad ku wareejisa Booliska. waxaa sidoo kale muhiim ah in aad dhibto dhamman dokumentiga aad wadato markaad timaado talyaaniga iyo kuwa kaaga imaan kara waddanka aad asal ahaan ka soo jeedid (tusaale: xaashidda safarka, shahaadada guurka, warqada caafimadka, sawwiro, maqaalo jaraa'iid. iwm),qaabkaan waxuu sahlaaya in la fahmo waxa dhacay iyo sida uu xaalkaada yahay.

Gaar haan:

- Haddi aad ka **yar tahay 18 sano**
- Haddi aad qabtid **cudurro halis ah**;

- Haddi aad tahay **waalid leh caruur yar-yar**
- Haddi aad **xaamilo tahay**
- Haddi aad **naafo tahay**
- Hadaad u baahan tahay in laga caawino **xagga dhimirka** ama aad ka **badbaaday jir dil** ama **xad-gudub jireed, maskaxiyeed,kufsi xad-gudub abtirsiino**, ama **jinsiyadaada lab/dheddig** ama aad tahay **dhibane muqalas**, ama **dhibane gudniin fircooni**.
- Haddi aad leedahay baahiyo kale oo gaar kuu ah

ha ka waaban in aad la hadasho Booliska, ama shaqaalaha jooga xeradda aad martida ku tahay, ama ururadda caawiya codsadayaasha magangelyo doonka ah ama qareenkaada.

Sabaabahan dartood waxaad xaq uu leedahay :

1. In lagu dajiyo **xarun qaas** ah (tusaale: xarumaha caruuraha da'da yar-yar ama xarumaha lagu daryeelo kuwa halista ugu jiro in loo geysto ficil kufsi ah);
2. In ay kula socdaan **shaqaale waayo-arag ah kaana taageraan** arrimahaan (takhtar, takhtar cilmi nafsi iyo arrimaha bulshadda..);
3. In codsigaada la siiyo **mudnaanta koowaad**.

Foomka C3 ayaad saxiixaysaa,waxaa kale oo saxiixaya sarkaalka Booliska iyo tarjumaha ku caawinay iyo qofka masuulka kaa ah haddi aad tahay qof ka yar 18 sano (tutore) (akhri bogga 16 micnaha ereygaan) ama masuulka xeradda aad martida ku tahay. Waxaad dib u heli doonta nuqulka foomka oo saxiixan iyo dokumentigii aad dhibatay.

## DIGNIIN

Haddi uu isbeddelo ciwaaankada (meesha aaad deggan tahay ama telefoonkaada) waad inaad ogeysisaa Booliska iyo guddiga xaduudaha si aad u hesho wargelinta ku saabsaan codsigaada, tusaale ahaan : tariikhda wareysiga guddiga komishiinku kula yeelanaayo . Saas darted akhri qaybta "Sidee ayaa lagu sheegayaa go'aanka?" waxaad ka heleeysa bogga 29.

# Mabda'a Xafidaada

Xogta ku saabsan codsigaada magangelyo doonka caalamiga ah waa qarsoodi, lama shaacii karo dadka ku hawlan iyo Booliska waxaa. qasab ku ah inay dhooran . Sharciga masuuliyiinta Talyaaniga waxuu dhigaaya in xogtaas ku saabsan codsigaada magangelyo doonka in aan loo gudbin karin shaqsiyaad kale xataa masuuliyiinta ka soo jeeda waddankii aad ka timid , adigoo rali ka ahayn cidna looma sheggi karo arrimahaada, kuwaas oo khatar gelin kara adiga iyo familkaada.

# ILAALINTA XOGTA SHAQSIGA

Inta lagu jiro nidaanka loogu tala galay codsashadda magangelyo doonka caalamiga ah iyo qiimeynta Xeerka Dublin, waxaa la aruurinayaa macluumadka shaqsiyadeed (xogta shaqsiga, raadka faraha, dokumenti iwm), kuwaas oo sahlaaya in la ogaado waxaad magangelyo doon u tahay, muhiimna u ah musuliyiinta Waddammada Yurub si loo diwaan geliyo gelitaanka iyo joogista arladda Yurub.

Xoogtan waxaa loo isticmaali kara oo kelina ujeedooyinka sharciga ah,waxaana lagu ilaaliyaa oo si amman ah ugu xafidan yihiin keydka teknolojiyadda xogta qarsoon , adiga waad arki kartaa iyo shaqaalaha u amran fulinta hawshaan.

Kaydadka xogtaan waxaa ka mid ah:

- **Vesta.net:** waxaa kuu jira dhamman macluumadka ku saabsan codsiyadda magangelyadda calamita ah.
- **Dublinet:** waxaa ku jira dhamman maclumaadka ku saabsan maareynta iyo khibradda waddanka iyo qiimaynta codsiyadda magangelyadda
- **Eurodac:** waa nidaam elektronik ah oo kaydiya is barbardhiga sawiradda faraha codsadayaasha qaxooti doonka ah, ujeedadu waxay

tahay in la diiwangeliyo qofka soo gala xaduudaha waddamadda xubnaha midowga ku jira oo soo bandhigtay codsi qaxooti.

Inta lagu gudo jiro hawshaan waxad xaq u leedahay :

1. In aad ogaatid hay'ahada awooda u leh xeerka Dublin iyo hayaddaha masuulka ka ah oo damaanad qaaday ilaalinta macluumadkaada .

2. in aad arki karto xogta adiga ku quseeyso

3. in aad heli karto wargelin ku saabsan haabkii aad u saxi laheyd ama u tirtiri laheyd xogta hore loo yiri.

4. in aad codsan kartid in macluumadkaada (xataa kuwa ku jira Eurodac) in la saxi karo haddii ay sax ahayn ama la tirtiri karo hadii loo isticmaalay si aan wafaqsaneeyn sharciga hadda jira.

## Waxaan ahay caruur aan lala socon, maxaan sameeyaa?

Haddi aad ka yar tahay 18 sano,oo ad haysan qaraabo kula socoto, isla markiiba wargeli Booliska, ama shaqaalaha xarunta aad martida ku tahay, si aad u heshid **damaanada gaarka ah ee la siiyo caruurta da'da yar oo aan lala soconin**. Taas waxay kuu sahlaysaa :

- In laguu geeyo xarun khas uu ah caruurta yar-yar
- In Garsooruhu ku magacabo qof qaan gaar ah oo masuul ka noqda, oo ku hagaaya kuna siinaya taagero oo ilaali doona danahaaga (" **tutore** "). Qofkaan waxaa uu ka cawinahayaa hanaanka lagugu aqoonsanaayo magangelyada caalamiga ah.
- Haddi qof ka mid ah familkaada uu deggan yahay si sharci ah waddan ka mid ah Midowga Yurub, waxaad codsan kartaa in aad ku darsanto familkaada;
- Codsigaada magangelyo doonka ah waxaa loo baarayaa si mudnaan leh.

Haddi aad leedahay **warqad aqoonsi** ama shahaadooyin kale oo caddeynaayo sannadka aad jirtid la soo bax. Masuuliyiinta Talyaaniga haddi uu shaki ka galo da'daada yar waxay ku weedin karan in wareeysi aad la yeelatid takhtar leh takhsuus caafimad sare oo kaa qaada baaritaan lagu ogaanaayo sannadka aad jirtid. Baaritaankaa caafimad waxaa fulin doona shaqaale gaar ah. Waxaa ku cawini doono tarjume yaqaano luqadaada iyo xaaladaada.

# 3. XAQUUQDA IYO WAAJIBAADKA MAGANGELYO DOONKA

Haddi aad caddeysid rabitaankada ah in aad codsatid magangelyo caalami ah waxaad tahay “ **magangalyo doone** “: Magangalyo doonayaasha waxay leeyihiin xaquuqo iyo wajibaadyo u gaar ah.

## Waa maxay wajibadkeeyga?

**WADA-SHAQAYN:** mar kasta waxaa laga rabaa oo khasab kugu ah **wadda-shaqayn** hawlwadeenaha kula wadda habka aad ku heleysid magangalyadda caalamiga ah sidii ay kula aruurin lahayeen **wiixii dokumenti ah oo aad haysatid iyo inaad sheegtiid wixii maclumaad ah** oo kaa caawini kara arrimahaada.

**OGEYSIIN WIXII IS BEDDELA**: waxaa wajib kugu ah in aad u **sheegtid** Booliska haddi aad badashay **ciwaankada ama mesha aad degganayd** siddi mar kasta loo ogaado meesha lagaa helo. Haddi aadan subin ama cinwaankaada uu sax ahayn ma aad ogaan kartid wargelinta ku khuseeysa oo ku saabsaan magangelyadda aad codsatay ( fiiri farqada “ Sidee baan ku ogaanahayaa go’aanka ?” warbaxin dheraad ah fiiri bogga 29).

**IN AAD TIMAADID WAREEYSIGA**: waaa kugu khasab ah **inaad timaado** komishiinka degganka sidii aad u suubin laheeyd iinterfiyuuga maalinta iyo sacadda lagugu talagalay in laga qaado interfiyuuga, waxaa dhici karto in xaalado culus dartood u imaan karin, waxaad codsan kartaa in lagu soo hor mariyo. **Wargeli Komishinka degganka sidda ugu dhaqsiyaha badan**; haddi add xarun soo dhaween aad marti ku tahay ayagaa ku cawinahaya.

**JOOGISTA DALKA TALYAANIGA**: inta ay macluumaadkada ku socdaan **ma ka tagi kartid dalka Talyaaniga**. Haddi magangelyo caalami aah aad ka codsatid waddan kale oo Yurub ah waxaa lagugu soo celinaaya Talyaaniga.

**DHOWR SHARCIGA TALYAANIGA**: waxaa khasab kugu ah in aad mar kasta dhowrtid sharciyadda u yaala dalka Talyaaniga. Haddi shaki kaaga jiro wax saxan iyo wax reeban **waxaad weydisan kartaa caawinad dhanka sharciga**.

## DIGNIIN

- Haddi lagugu xukumay dambi culus (tusaale : dagaal ama hanjabaad sarkaal dowladeed, dhaawac daran oo aad shaqsi u geeysatay, xatooyo guri oo isticmaashay hub, dhac, baad, ibiinka iyo suubinta mandooriyaha, kufsi, muqalas ka ganacsada dadka);

ama

- Haddi ay kugu socoto dacwad dambi culus[1] oo aad geeysatay , oo aad ku jirtid Xeradda la geeyo kuwa dib loo celinaayo ;

labadda arrimood dartood sharciga waxuu ku sahlaaya in si deg-deg ah kuu qaabilaan guddiga komishiinka degganka sidii lagaga qaado interfiyuuga shaqsiga ah, haddi qiimeynta codsigaada uu noqdo diidmo, sharciga waxuu dhigaaya in aad ka tagtid talyaniga xataa haddi aad ka qaadatid racfaan.

# Waa maxay xaquuqdeyda magangelyo doonka?

**WARGELIN**: xafiiska Booliska markuu helo codsigaaga magangalyo doonka ah waxuu kuu sheegayaa waxa aad xaqa u leedahay iyo wajibaadka adiga laga rabo inta lagu gudo jiro arrimaha kuu saameeya.Waxii intaas dhaafsan oo wargelin ah waxaad la xariiri kartaa sharci yaqaanka jooga xarunta aad martida ku tahay ama urrurada caawiya codsadayaasha magangelyo doonka ah iyo qaxootiga. Marxalad kasta waxaa la soo xariiri kartaa Ha'yadda Qaxootiga ee Qaramadda Midoobay - UNHCR.

Dhamaadka tilmaamahaan waxaa ka heli kartaa xariiro fa'iido kuu leh.

**DEGGANAASHADDA TALYAANIGA**: haddi aad tahay magangelyo doon dalka Talyaaniga waad degganaan kartaa ilaa iyo intii aad ka heleeyso natiijadda codsigaada magangelyo doonka ah.

1 Waydii sharciii yaqaan waxii macluumad dheeraad oo ku saabsan dambiyadda.

*Mararka qaarkood waxaa dhici karto in aad xaq u laheeyn in aad sii joogto dalka Talyaaniga Sidaas darteed akhri qaybta " Sidee baan racfaan uga qaadan kargo'aanka uu iga gaaray guddigga deggaanada?" fiiri bogga 30. Akhri qaybta " Ma soo gudbin karaa codsi kale oo magangelyo calami ah?" fiiri bogga 31.Waydii qof sharci yahaan ah su'aalo la xariira arrimahaan.*

**SIIN DOKUMENTI** : waxaa lagu siinayaa **ogolaansho joogitaan si aad u codsatid qaxooti**, waxay la dhigmataa dokumenti fasax kuu siinaaya in aad joogi kartid dhulka Talyaaniga. Rukhsadaan waxay ansaxsantahay ilaa iyo inta go'aan laga gaarayo codsigaada magangelyo doonka ah.

*Wixii arrintaan la xariira waydii macluumaad dheeri ah hawlwadeenada sharci yaqaanka ah.*

**DARYEELKA CAAFIMADKA**: waxaad xaq uu leedahay daryeel caafimaad oo **lacag la'aan ah**.

**WAXBARASHO**: waxaa xaq uu leedahay in aad skool isku qortid.

**SHAQO**: Laba bilood kadib markaad soo gudbisay codsigaadii magangalyo doonka ahaa, **waad shaqayn kartaa** ilaa iyo inta ay marxaladahaada ku dhamaanayaan .

*Ogolaanshaha joogitaanka oo laguu siiyay in aad codsatahay magangalyo doon ma u badali kartid ogolaansho joogitaan sababo shaqo xaqna uma lihid dib u mideynka qoyskada/familkaada.*

**SOO DHAWEYN:** haddi aadan haysan hoy nololeed waxaad xaq uu leedahay **xarunta** lagu soo dhaweeyo magangalyo doonayaasha.

# 4. SOO DHAWEEYNTA

## Ma haysto ilo dhaqaale ma la i caawini karaa ?

Markaad soo gasho dalka Talyaaniga, waxaa lagugu soo dhaweynaaya xarunta ugu horeeysa ee **gargaarka iyo cawinadda** halkaas oo aad ka heleeysid daryeel iyo macluumadka ugu horeeya.

Kadib markii Booliska ku aqoonsado, oo aad u sheegtid in aad rabtiid in aad codsatid magangelyo caalami ah, oo aad haysan dhaqaale kugu filan hoy iyo cunno waxaa lagugu wareejin doona **xarunta soo dhaweeynta magangalyo doonka** meshaas oo aad joogi karto ila iyo inta ay ku dhamanahayo nidaamka aqoonsiga magangalyo doonka. (waad sii joogi kartaa haddi uu jiro racfaan aad ka qaadatay xaakinka maxkamadda oo lid ku ah go'aanka uu ku siiyay Guddiga komishiinka degganka).

Haddi aad tahay caruur da'yar oo aan lala socon waxaa xaq u leedahay in lagugu soo dhaweeyo xarummo loogu tala galay khaas ahaan da'yarta : Haddi aadan haysan aqoonsi dokumenti oo caddeyn kara da'aada jirto, waydiiso maclumaad dheeri ah massuliyinta xerradda aad martida ku tahay.

# Waa maxay xaquuqdeyda iyo waajibaadkeyga marka aan joogo xarunta soo dhaweeynta ?

Qanuunka xarunta waxuu ku tilmamaaya waxaa aad xaqa uu leedahay iyo wajibaadka laga rabo inta aad joogtid.

waxaad **xaq** uu leehaday in :

**A.** In lagu siiyo **hoy xufan** . oo qololka ragga iyo dumarka ay kala kheybsan yihiin, haddi aad tahay caruur da'-yar waxaad xaq uu leedahay in aad familkaada la noolatid.

**B.** **Cunto** kugu filan, oo ku haboon baahiyahaaga iyo cadooyinkaaga.

**C.** **Dhar** iyo **waxyaabaha loo isticmaalo nadaafadda shaqsiyeed**.

**D.** Tabaruuc **lacageed** oo aad u adeegsan kartid kharashyadda yaryar

**E.** **Caawinaad caafimaad**

**F.** **Caawinaad takhtarka dhimirka iyo nafsiga**

**G.** Wargelin **Sharciga Talyaaniga**

**H.** **Tarjume yaqaan luqadaada iyo dhaqankaada**.

**Xerrada waxaad xaq uu leedahay in ay ku soo booqan karaan massuliyiinta Hayadda Qaramadda Midoobay ee Qaxootiga UNHCR, qareenkada, iyo haddi famil aad leedahay**. Xerradda soo dhaweeynta waxaa kale oo soo gali kara uruuradda daryeela qaxootiga iyo dad kale oo codsaday oo haysta amar ay ku soo galan.

**Haddi aad qabtid baahi kuu gaar ah , waxaad ogeysiin karta hawlwadeenada xarunta si aad u hesho cawiinad.** Tusaale ahaan haddi aad uur leedahay, ama jirka dhibaato kaa hayso , ama dhibaatooyin maskaxeed, ama uu kugu dhacay fal jir dil, dhimireed, kufsi.

Sidii add u sahli laheeyd in la garto baahiyahaaga ha ka cabsanin in aad ka sheekeeysid arrimo dhib badan iyo xanuun badan oo ku soo maray., ogsoonow

hawlwadeenada waxaa waajib ku ah in ay dhowran sirta xogtaada , ma faafin karaan macluumaadkaada adigoo raali ka aheeyn.

Inta aad xarunta joogtid **wajiibadkaadu** waa :

**A.** Mar walba in aad kula **dhaqantid edeb iyo xushmad** martida kale iyo shaqaalaha ka shaqeeya xarrunta soo dhaweeynta.

**B.** Mar kasta xurmee **Xeerka**
Waxiii xeer jabin culus ah oo aad geysato waxay sababi karaan in lagala noqdo soo dhaweeynta: Fahfaahinta arrintaan weydii maclumaad hawlwadeenada sharciga.

# Ma ka tagi karaa xarunta soo dhaweeynta ?

Xarunta soo dhaweynta waxay leedahay xeer, ay ka mid tahay dhooritaanka waqtiga. Maalinti xor baad u tahay in aad baxdo adigoo dhowraaya waqtiyadda la qorsheeyay. Xaalado gaar awgeed si aad u maqnaado waqti dheer waxaad codsan kartaa fasax : la xariir hawlwadeenada xeradda si ay kuu siiyaan macluumaad dheeri ah.

Haddi aad ka tagtid xeradda fasax la'aan ama aad ku soo laban weydid fiidkiii, waxaad lumin kartaa **xaquuqdaadii soo dhaweeynta**.

# 5. QIIMAYNTA CODSIGA IYO NATIIJOOYINKA SUURTAGALKA AH

Kadib markaad soo gudbisato codsi magangelyo caalamii ah, waxaa lagugu yeeri doona wareeysi/interfiyuu kula yelaanayo Guddiga Komishiinka dhulalka oo leh awooda qiimeeynta codsigaada.

Suggitaanka wareeysiga/interfiiyugu wuu kala duwanaan karaa, waxuu qaadan karaa asbuucyo ama dhowr bilood. Wakhtigaa u isticmaal in aad isku diyaarisid wareeysiga oo aad soo **aruuriso dokumentiyo** aad u bahnaan kartid, waxaad cawinaad weydisataa hawlwadeenada xerrada aad martida ku tahay ama ururadda ad rabto in aad tixraacdo. Waad u dhibi kartaa Guddigga Komishiinka dhulalka dokumentiga dhan oo aad u aragtoo in ay wax tar uu leeyihiin qiimeynta codsigaada.

**Haddi aad tahay caruur da' yar aan lala socon** oo add leedahay baahiyo gaar ah, codsigaada waxaa loo barayaa **si mudnaan leh.**

Wakhti kasta waad joojin kartaa codsigaada magangalyo doonka caalamiga ah. Siddad u ogaatid waxaad suubin la'heeyd, weydii macluumadka sharci yaqaan.

## Sidee buu wareysiga/interfiiyuga u dhacayaa ?

Waxaa wareysii ka qaadaayo sarkaal ka mid ah Guddiga Dhulalka: Waxaad codsan kartaa in interfiyuuga uu kaa qaado sarkaal nin ama naag hadba midkaad doontid, waa lagu fulinaaya haddi ay surtagal tahay.

Haddi ay kula tahay muhiim, waxad codsan kartaa in ay ku wareeystaan Golaha Guddiga Dhulalka ama madaxa Komishiinka.

Waxaa wareeysiga lagaa qaadayaa ayado uu joogo **tarjume luqadaada.** Haddi aadan si fiican u fahmin ama sababo qaarkood joogistisa ayaan ku siineen kalsooni, waxaad u sheegi kartaa sarkaalka interfiyuuga kaa qadaayo .



**Turjubaanku** waa shaqaale madax banaan oo dhexdhexaad ah oo gudbinahaya tarjumidda su'aalaha iyo jawaabaha.Waxaa waajib ku ah **xog-dhowrka**, ma ka mid ahaa guddiga qiimeynta.

**Wareeysiga waa shaqsi .** Haddi xataa uu yahay ninkaada/naagtada ama qarabo kale oo isla maalin la idin yeero wareeysiga interfiyuuga, qof kasta si gooni ah ayaa loo wareysan doona . Haddi aad ka yar tahay 18 sano oo aad la joogtid waalidkaada, komishiinku waxuu go'aaminaaya in uu ku dhageeysto ama in kale, haddi u go'aansado in uu ku dhageeysto, waxaa lagu wareysan doona walidkaada oo jooga .

**Haddi aad weli gaarin 18 sano oo aad la socon walidkaaga, waxaa wareeysiga laga qaadayaa massulkaada (tutore) oo joogo.** ( fiiri bogga 16).

Waxaa ku cawini karo **qareenkada** (xasuusnow marxaladaan ma jirto caawinaad sharci oo lacag la'aan ah).

Haddi aad leedahay baahiyo gaar ku ah , intaan wareeysiga/interfiyuuga la bilaabin waxaad codsan kartaa in ay ka qayb qaataan shaqaale ku taageero (tusaale : adeegaha bulshadda ama takhtarka cilmi nafsiga haddi uu hore kula socday).

Siddi wax kasta ay u noqdaan wax daahfuran wareysiga/interfiyuuga fiidiyo ayaa laga duubayaa haddi aysan jirin cillad farsamo.Hadaadan rabin in lagaa duubo muquaal fiidiyo, soo bandhig sababaha aad ku diideeyso. Guddiga Komishiinka dhulalka ayaa go'aan ka garaayo dalabkaada.

dhamman waxaad sheegtay inta lagu jiray wareeysiga waxaa lagu qorahayaa warqad la yiraahdo **warbixinta/barabaale dhageysiga**. Markuu dhammado wareeysiga dib ayaa lagugu akhri doona. Marka wareeysiga laga duubay fiidiyo, wareeystaha iyo turjubaanka ayaa saxiixaaya wareeysiga; adiga waxaa laga doonayaa in aad saxiixdo haddi aad ka bixisay fahfaahin. Marka wareeysiga aan laga duubin fiidiyo, waxaa lagaa codsan doona in aad saxiixdo si wadajir ah adiga, wareeystaha iyo tarjumaha.

Ka dib markaad akhrisid warbixinta waxaa lagu siin doona **hal nuqul/kobi**. Adiga ayaa go'aan ka gaari karo cidda akhrin karto (tusaale ahaan Qareenkada).

Guddiga Komishiinka dhulalka waxaa saaran waajibaad xog dhowrid ah ,ma la wadaagi karan cid kale oo ka baxsan hawlwadeenada nidaamka.( tusaale ahaan: maamulada waddankii aad ka timid, ama familkaada, ama xeradda aad martida ku tahay) macluumaad qarsooni ah adigoo rali ha aheeyn ciddna looma gudbin karo.. Sidaas darteed waxaad u hadli karta si **xor ah** .

# Su'aalahee la ii waydiin doona ?

Wareeystaha waxuu ka caawini doona sidii aad dib u dhisi laheeyd sheekadaada. Waa muhiim inaad la imaato **daacad iyo iskaashi** . Haddi aadan xasuusanin ama adaan aqoon waxa lagu weeydiyay, ama aad si fiicaan u fahmin su'aasha weydiiso cadeeyno.

Inta wareeysiga lagu jiro waxaa lagu weydiin doona macluumaad ku saabsan :

- **Aqoonsigaada** (asalkaaga, familkaada, dhaqankaada, waxbarashadaada, shaqadaada , diintada iyo fikradaada siyaasadeed);
- **sababaha aad uga soo tagtay waddankaagii asalka ahaa**
- **cabsida aad qabtid in aad ku noqoto waddanka aad asal ahaan ka timid** iyo halista aad la kulmi kartid.

# Suuraggal ma tahay in kiskeeyga la go'aamiyo wareeysi la'aan?

Waa ay dhici kartaa haddii :

1. Guddiga Komishiinka Dhulalka waxay la tahay in uu haysto dhamman qoddobadda ay kugu aqoonsan karaan xaalad qaxooti.

2. Xaaladaada kuma suuraggalin karto in aad sameeyso wareeysiga/ inferfiyuu (kiiskaan oo kale waa inaad wargelisaa Guddiga Komishiinka dhulalka oo aad soo gudbisaa waraaqadaha caafimad oo lagaa rabo)

3. Waa suurobi waysay in laguu wargeliyo wacitaanka wareeysiga/ interfiyuuga Guddiga komishiinka Dhulalka maxaa yeelay waa lagu waayay.kiiskaada waxaa lagu go'aamin doona diidmo. Si kastaba ha ahaate waad u tagi kartaa Guddiga Komishiinka Dhulalka oo u caddeyn karta sababta maqnaanshahaaga. Dib ayaa laguu soo wici karaa.

4. Ma imaan wareeysiga interfiyuuga Komishiinka , ma aad soo wargelin sababta. Kiiskada waxaa lagu go'aamin doona iyadoo lagu saleynaayo dokumentiga laga hayo.

*La xariir adeegaha sharciga si aad wax badan uu ogaato*

# Maxay noqon karaan natiijooyinka ka soo bixi kara Codsigayga magangelyo doonka ah?

Kiiskada waxaa baarayo oo qiimaynahayo guddi ka kooban 4 qof oo kala ah Madaxa Komishiinka, qof ka socda Ha'yadda Qaramadda Midoobay ee Qaxootiga UNHCR, laba sarkaal oo ka tirsan Wasaradda Arrimaha Gudaha (mid ka mid ah waa qofka kaa qaaday wareeysiga/interfiiyuga). Natiijooyinka ka soo bixi kara waxay noqonahayaan siddan :

- Aqoonsi Qaxooti
- Aqoonsi magangelyo kalmo
- Aqoonsi magangelyo gaar ah
- Diidmo codsi

# Kiisaskee la igu aqoonsan karaa qaxooti ?

Sida ku xusan shirkii Ginevra ee 1951, waxaaa laguu aqoonsaday qaxooti **haddi ay jirto cabsi dhab ah in lagugu silacdilyeeynaayo waddanka aad asal ahaan ka soo jeedo sababtoo ah :**

- **Isir** ( tusaale ahaan: midabka maqaarka ama hadaad ka soo jeedid koox qoomiyadeed);
- **diin** (tusaale ahaan : diintada ama cibaadooyin aad ku dhaqanto ama kuwoo aad ku dhaqmin);
- **jinsiyadda** (tusaale ahaan : luuqadaada, dhaqankaada iyo asalka qoomiyaadada);
- **fikirkaada siyaasadeed** (tusaale ahaan: aad ka tirsan tahay kooxo siyaasadeed ama fikirkaada siyaasadeed);
- **ka tirsanaanta koox bulsheed gaar ah,** waa koox leh astaamo guud oo ay isku aqoonsadan, bulshadda kalena waxay u aragtaa koox gaar

ah astaamahaas dartood. (tusaale ahaan: waddamo qaarkood, cayn tilmaan jinsi gaar ah, shaqo qeexaan; ama qaab nololeed gaar ah);

**oo aad ka heli karin magangelyo waddanka aad asal ahaan ka soo jeedo.**

Haddi aad tahay waddan-laawe ama adaan haysan jinsiyad, waddanka lagu tixgilinaayo waa midkii caadi ahaan ad ku nooleyd.

Tusaalooyinka silicdilyeenta waa hanjabaahada nolosha, jir dilka, addonsiga, xayiradda xorriyadda shaqsiga, gudniinka fircooniga, ama xadgudubka culus ee xaquuqda asaasiga ee bani'aadamka, ama xadgudubyo kale wax u dhibayaa xaquuqda aad leedahay.

# Kiisaske la igu aqoonsan karaa magangelyo kaalmo?

marka ayaan jirin siyaabo lagugu aqoonsado qaxooti, waxaa lagu aqonsanayaa magangelyo kalmo, haddi ay jiraan sababo dhab ah oo la tixgalin karo sida haddii aad waddankii aad ka soo jeeday aad ku laabatid waxaa ku soo gaari kara khatar halis ah ( xukun dil, jir dil,kula dhaqmid si bani'aadannimadda ka baxsan ama, cabsi dhimasho maxaa yeelay waddankada waxaa ka socda dagaal loo adeegsanayo hub) oo ma ka heleeysid magangelyo waddankii aad asal ahaan ka soo jeeday.
Sidoo kale kiiskaan oo kale waa haddii aad tahay waddan-laawe, waddanka lagu tixgelinaayo waa midkii caadi ahaan aad ku nooleed.

# Kiisaskee la igu aqoonsan karaa magangelyo khaas ah?

Xaaladaa gaarkaa ah oo laguu aqoonsan karin magalgelyo caalami ah awgeed, laakiin waddanka aad ka soo jeedo waxaad ku jiri laheed halis cadaadis, jir dil,iyo noocyo kale oo fool xun oo lagula dhaqmin bani'aadanka, sidaas daradeed waxaa laguu aqonsanayaa magangelyo khaas ah.

# Kiisaaskee komishiinka uu diidi karaa codsigaayga?

Markii la baray dhamman waxyaabahaada, Komishiinku waxuu rumeeysayahay in **ay jirin sharuudo** lagugu aqoonsan karo magangelyo nooc kastaba ha ahaate, marka codsigaada waa la diiday.

Mararka qaarkood codsigaada waa la diidi kara **muujiin wax aan jirin**. waxaa dhici karto tusaale ahan in sheekadda aad uga sheekaysay Guddiga Komishiinka ayaan wax xariir ah la laheeyn magangelyo caalami ah; adigoo ka timid waddan massuliyiinta Talyaaniga ay u arkaan in uu yahay waddan nabad ah ; kadib markii aad martay nidaamka magangelyo doonka, Komishiinku waxuu rumeystay in xaaladaada shaqsi ayaan jirin sababo dhab ah oo lagu tixgalin karo in waddankaadu u yahay mid aan amiin aheeyn haddi lagugu celiyo; haddi aad dhiibatay dokumenti been buur ah oo adaan soo sharraxin sababaha aad u suubisay falkan; ama haddii aad diiday in laga qaado raadka faraha.

## Digniin

Haddi codsigaada lagu diiday go'aan ah muujin wax aan **sax aheeyn**, muddada suurtagalka ah oo aad Racfan u soo gudbin kartid Garsooraha hortiisa waa 15 berri ( fiiri bogga 30 sii aad uga heshid maaclumaad ku saabsan racfaanka ka dhanka ah Guddiga Komishiinka Dhulaalka) kiiskaan waxad sii joogi kartaa Talyaaniga, ilaa iyo intii la gaarayo go'aanka racfaanka, qareenkada waa inuu waydiyaa oggolansho khaas ah Garsooraha.

*Si aad u ogaatid dhamman mala'awaalka codsigada oo lo arko wax aan wax ka jirin iyo cawaaqibta ka soo bixi karan falkan. weeydi macluumaad dheerad ah sharci yaqaan.*

# Sidee ayaan ku oggaanayaa go'aanka kiiskeeyga?

Jawaabta codsigaada magangelyadda caalamiga ah qoraalkiisa waxuu ku jira hab qoran oo ah tillabada Guddiga Komishiinka dhulalka , waxaana ku ogeeysin doona shaqaalaha xerrada aad ku jirtid, ama habka boostada cinwaanka hoyga lagaa helo oo hore ad ugu sheegtay Booliska waqtiggi la diwaangelinayay codsigaaga (fiiri bogga 12) ama mar ku xigtay.

Sidaas darteed waa muhiim in la wargeliyo Booliska iyo Komishiinka dhulalka mar kasta oo aad badashid cinwaankada , oo aad ku sugtid go'aanka Komishiinka xeradda soo dhaweeynta oo martida ku tahay ama hoyga aad sheegatay in aad deggantahay. Hadaadan sameeyn waxaa dhici karta in aad helin wargelinta go'aanka laga gaaray codsigadii magangelyo doonka.

## Digniin

Hadaadan helin wargelinta sababto ah ma joogin xerrada soo dhaweeynta ama meeshii aad sheegatay in aad deggantahay, waxaad ka qaadan kartaa Booliska, meeshaas Booliska waxay ooli kartaa labaatanka malmood oo ka dambeeysa ogeysiintaan.

labaatanka maalmol ka dib tallaabadaan waxay ku wareeygaysaa oo loo dhiibayaa massuliyiinta Talyaaniga ayagoo fulin doona qoraalka go'aankaas.

- xaquuqda add ku joogi laheeyd dalka Talyaaniga, ama aad uga bixi laheeyd Talyaaniga waxay ku qoran tahay qoraalka ku yaal tallabadaan.
- Waxaa bilaaban doona socodsiinta sharuudaha aad ku soo gudbin kartid codsi racfaan ku lid ah go'aanka Guddiga Komishiinka dhulalka ( fiiri faqradda ku xigta).

Waxaad mar kasta ka codsan kartaa komishiinka dhulalka kobiga tallabada.

# Ma sameeyn karaa racfaan lid ku ah go'aanka Komishiinka dhulalka?

Haddadan raali ku aheey go'aanka uu kaa gaaray Komishiinka dhulalka, waxaad weydisan kartaa Garsooraha in uu dib u fiiriyo kiiskada, adigoo kaashaneeysid **qareen** aad ku kalsoon tahay.

Fiiro gaar ah u yeelo **waqtiga** dhicitaanka (**30** ama **15** maalmood hadba siduu yahay kiiska), kuwaas oo lugu muujiyay qaybta hoose ee go'aanka.

Haddadan haysan dhaqaale kugu filan, waxaad xaq uu leedahay in uu ku cawiiyo qareen **lacag la'aan ah.**

Markaasta oo racfaan aad ka qaadato go'aanka diidmada waxaad leedahay xaq in aad **sii joogi karto Talyaaniga** ilaa iyo inta uu ka soo baxaayo go'aanka maxkamadda. Xaaladaha qaarkood si aad u sii joogto Talyaaniga qareenkada waa inuu Garsooraha ka codsadaa (tusaale haddi aad ku jirtid Xerradda dadka dib loogu celinaayo waddankoodi ama codsigaadii u ahaa been abuur aan sal laheeyn).

Waxii macluumad dheerad ah weydiiso cawinaad hawlwadeenada xerrada aad martida ku tahayy ama ururada caawiyo magangelyo doonka ama qareenkada.

## Digniin

Inkasto aad ka soo gudbisay racfan go'aanka guddiga komishiinka dhulalka, sharciga waxuu dhigayaa laba kiis oo addan xaq u laheeyn in aad sii joogto Talyaaniga. :

A) Kaddib markaad soo gudbisay codsi magangelyo oo lagu siiyay go'aan diidmo ah, oo aad weli is leedahay waxaad u bahantahay magangelyo caalami ah oo aad soo gudbisid codsi cusub laakiin komishiinka waxuu cadeeyay in uu aqbali karin maxaa yeelay ma jiraan xaalado cusub oo is badalay shaqsi ahaan ama xaalada waddankaada iska badalay (fiiri faqradda " codsi la diiday" ).

B) Codsiggada magangelyo doonka waxaa lagu qiimeeyay diidmo oo lagu fuliyay dacwad ded-deg ah ( fiiri bogga 18 ).

*La xarrir sharci yaqaan ama qareenkaada siddi aad u heli laheeyd faafahin dheerad ah oo ku saleeysan xaaladdaha laa filaayo inaad ka tagto Talyaaniga.*

# Ma soo gudbin karaa codsi cusub oo magangelyo caalami ah.

Waad soo gudbin karma **codsi cusub** haddii :

- Haddi aad ka noqotay codsigii aad hore uu dhiibatay;
- Haddi codsigaadi hore komishiinku uu ka gaaray go'aan qeexan, kaas oo micnaheedu yahay in uu dib u fiirin karin Garsoore

Codsiga cusub waxaa loogu magac daraa " **ku celin** "

Guddigga Komishiinka dhulalka xawuu qiimeynayaa codsiga la soo celiyay gaar ahaan hadii ay jiraan **marxaladoo cusub** oo la tixgelinkaro si go'aan looga gaaro baahidaa magangelyo doonka ( tusaale ahaan : isbadal ku yimid xaaladda waddankii aad ka soo jeeday ama isbedel xaaladda nolashaada, ama aad haysatid dokumenti cusub oo aad soo bandhigto). Haddaadan soo bandhigin marxaladoo cusub codsigaada lama qiimeeyn karo sidaas darteed waxaa tahay mid **aan la oggolayn**.

## Digniin

Haddi aad soo gudbiso codsi hore loo soo celiyay adigo ku dhow in laga saaro waddanka Talyaaniga (gaar haan markad ku jirtid xarrunta loogu tala galay dadka dib loo celinaayo ), sharciga Talyaaniga waxuu dhigayaa in si toos ah codsigaas aan la aqbali karin oo aan la baari karin.

Sidaas darted waa muhiim haddii aad haysatiid waxyaabo cusub oo la xariira codsiga magangelyo doonka caalamiga ah in aad si dhaqsiyo leh u soo bandhigta codsi cusub .

# Maxay yihiin nidaamada la dadajiyay ?

Xaaladaha soo socda awgeed codsigaada waxaa lagu baari karaa nidaam waqti yar qaadanaayo:

**1.** Soo gudbin **codsi** magangelyo caalami ah si toos ah **xaduuda**, ka dib markaad isku dayday in aad soo gashid dalka talyaaniga adigo ka xaadarin kontaroolka Booliska;

**2.** Waxaad ku **jirta** xarun lagu xaqiijinaayo aqoonsigada ama dhalashadaada;

**3.** codsigaada waxuu la mid noqday "**muujin wax aan jirin** " (tusaale ahaan Guddiga komishiinka dhulalka ayaa rumaysan marxaladihii aah ka hadashay wareysiga interfiyuuga, ayaan wax xariir ah la laheeyn magangelyo calami ah ; adigo ka timid waddan massuliyiinka Talyaaniga ay u arkaan in uu yahay waddan nabad ah; kadib marki aad martay nidaamka magangelyadda komishiinku waxuu rumeestay in xaaladada shaqsi ayan jirin sábabo dhab ah oo laguu tixgalin karo in waddankaadu u yahay mid aan amiin aheeyn hadii lagugu celiyo; haddi aad dhiibatay dokumenti been buur ah oo adan soo sharraxin sababaha aad u suubisay falkan; ama haddii aad diiday in laga qaado raadka faraha). Fiiri farqada " Kiisaaskee komishiinku uu diidi karaa codsigayga?" bogga 28.

Haddi aad ku jirtid habka degdegsiinta oo aad u bahan tahay maalmoo dheerad ah oo aad ku soo aruuriso waxyaabaha ka cawinaayo kiiskada iyo isku toosinta codsigaada magangelyadda caalamiga ah, si dhaqsiyo leh ugu sheeg aqoonyahanadda sharciga iyo komishiinka dhulalka.

# 6. XAQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKADA KA DIB AQOONSIGA MAGANGELYADDA

## Mutaystayaasha magangelyadda caalamiga ah ( qaxooti ama magangelyo kalmo), waa maxay xaquuqdayda ?

**IN LAGU SIIYO DOKUMENTI :**

1. Ogolaansho sharci aad ku joogto Talyaaniga, **ogoolansho joogitaan** oo ansaxsan ilaa iyo **5 sano** oo la cusboonaysiin karo;

2. Si aad ugu safarto meel ka baxsan dalka Talyaaniga; **dokumentiga safarka** (haddi aad tahay qaxooti) ama **warqadda safarka** ( haddi lagu siiyay aqoonsiga kalmo,oo ay jiraan sababo macquul ah oo adaan basaboor ka dalban karin maamuladda dibloomaasiga ee waddankaada.

Dokumentigaan waad gali karta kuna joogi kartaa adigo u baahnay fiiso 26 Waddan Yurub e **degganka Schengen** ilaa iyo **3 bilood** (ma ka shaqeeyn kartid mana degganaan kartid).

5 sano ka dib codsigaadii magangelyada caalamiga ahaa oo la timaaddid sharuudo kale (dakhli, iyo in adaan dembi galin), waxaad codsan kartaa **ogoolaanshada joogitaanka Ururka Yurub oo loogu tala galay dadka muddada dheer degganna.** Ogoolanshahan waxaad ku gali karta degganan karta si joogto al waddamadda kale ee ururka Yurub in ka badan 3 bilood, shaqaale ahaan, arday ahaan, ama sababo kale, ayaado la raacayo qanuunka waddanka aad rabto in aad degganaato.

**SHAQO:** Waxaad ka qayb qaadan kartaa suuqa shaqadda guud, midda shaqaaleynta bulshadda oo la siman tahay muwaadiniinta Ururka Yurub.

**ISKU QORIDDA DIWAANKA :** Iska diiwaan geli degmadda aad deggan tahay isla sharuudaha ay leeyihiin muwaadiniinta ajnabiga ah.

**WARBARASHO, KALKAALKA BULSHADDA, DARYEELKA CAAFIMAADKA :** Waxaad leedahay xaq la mid kuwaa ay leeyihiin muwaadiniinta Talyaaniga .

**HOY :** Waad ka qeyb qaadan karma qooyndaynta guryaha dadweeynaha.

**ISKU KEENIDDA QOYSKA:** Waxaa awooda in famiilkada uu ku imaan karo ayadoo loo bahneen in aad muujisid in aad leedahay dakhli ama hoy.( waxaa kuu imaan kara xaaska, caruurta yar-yar, walidkaada haddu dhaafay 65 sano uu laheeyn ilmo kale oo ku xafidi kara waddanka u ka soo jeedo; waxii fahfaahin dheerad ah iyo maclumaadah waxa weydisaa hawl wadeenada sharciga).

**DHALASHO:** Waxaad weeydisan kartaa dhalashadda Talyaaniga 5 sano ka dib haddi aad leedahay aqoonsiga qaxooti; 10 sano ka dib haddi aad leedahay aqoonsiga magangelyo kalmo.

# Haddaan leeyahay magangelyadda khaaska ah ?

Waxaad xaq uu leedahay :

**SIIN DOKUMENTI : oggolansho degganansho 1 sano ah**, oo la cusboonaysiin karo haddi weli aad u baahan tahay magangelyo.

**Waxaad weydiisan kartaa dokumentiga safarka ee ajnabiinta;** haddi aad basaboor ka dalban karin maamuladda dibloomaasiga ee waddankaada.

**SHAQO :** waad u shaqeyn karta si rasmi ah , laakin ogoolaanshaha joogitaankada ee magangelyadda khaaska ah ma u beddeli kartid ogoolaansho joogitaan sabab shaqo.

**ISKU QORIDDA DIWAANKA:** waxaad isku qori kartaa degmadda aad deggantahay.

**KALKAALKA BULSHADDA iyo DARYEELKA CAAFIMAADKA.**

# Waa maxay wajiibadkeeyga ?

## MAR KASTA IXTIRAAM SHARCIGA TALYAANIGA

Haddi ay dhacdo khatar ah in aad uu hogansanayn sharciga Talyaaniga, kiiskaada dib ayaa loogu qiimeeyn karaa ka qaadis aqoonsiga magangelyadda caalamiga ah (*fiiri farqadda "joojinta iyo kala laabasho magangelyadda caalamiga ah").*

# Ma ku noqon karaa waddanka aan ka soo jeedo?

Haddad haysato aqoonsi qaxooti oo weydisatid baasabor massuliyiinta waddanka aad ka soo jeedo

ama

Hadaad haysato aqoonsi qaxooti ama magangelyo kalmo oo ku noqoto waddankii aad asal ahaan ka soo jeeday, xataa muddo gaaban,

waxad ogaata in arrintaan ad ku kacday ay sabab u noqon karto in dib looga laabto magangelyadda caalamiga oo laguu aqoonsaday. ( *fiiri farqadda kala laabasho magangekyadda caalamiga ah bogga 36*).

**Haddi aad go'aansato in aad ku noqotid deggan ahaan waddanka aad ka soo jeedo,** oo aad haysatid sharuuhada loo baahan yahay, waxaad ka qayb qaatan kartaa dadaalada : **cawiinaada laabaashadda iskaada ah iyo dib-u dhexgalka bulshadda.** barnaamijyadaan waxay bixiyaan safarka, waxay daboolan kharajka ilaa iyo aad ka tagtid meeshad u socotay, iyo xooga tabaruuc dhaqaale ah.

*Waxaad la soo xariirta karta Uruurka Caalamiga ah ee Socdaalka (OIM) numbarka cagarka 800 2000 71 si aad u hesho maclumaad dheerad ah iyo barnaamijyadda jira markan.*

# Joojinta iyo kala laabasho magangelyadda Caalamiga ah

- Magangelyadda caalamiga waa la **joogin** karaa marka aysan jirin daruufihii lagugu siiyay (tusaale ahaan xaaladda waddankaada waaxay isku beddeshay mid deggan ila iyo heer u jirin cadaadis ama waxyaalo halis ah ama waddankada aa si iskada ah aad ugu noqotay).
- Magangelyadda caalamiga waa la iskala **laaban** karaa marka la hubsado in lagugu aqoonsaday arrimo ay xaqiiqdooda si qaldan aad u soo bandhigtay, ama dokumenti been abuur ah ama markii la ogaado in aad geeysatay dambiyadda ka dhanka ah ba'niaadanka, dambiyadda ka dhanka ah nabadda dambiyadda dagaalka , lagugu xukumay dambiyo culus ( sida horornimo, hanjabaad sarkaal dawladeed, dhib culus shaqsi, xatooyo, dhac, baad, suubin ama gadid mandoorshe, kufsi, muqalas) ama aad khatar u tahay nabadgelyada Waddanka Talyaaniga.

Xaaladahaan Komishiinka Qaran ee Xaquuqda Magangelyo dib ayuu u soo qiimeeyn karaa kiiskada oo go'aamin kara jooginta iyo kala labashada aqoonsiga Magangelyada Caalamiga ah.

*Si aad u hesho maclumaad dheeri ah la xariir sharci yaqaanka xeradda ama urruradda daryeela qaxootiga kii ku dhow.*

# 7. NOOCYAAL KALE OO DAL KU JOOG AH

Haddi ay kula tahay in aad qabin sharuudaha aad ku codsan karto Magangelyo caalamiga ah waxaad weydiin kartaa Goobta Booliska siddi ai kuu siin lahayeen noocyaal kale oo joogitaan ah .

**1. OGOOLAANSHO JOOGITAAN CAAFIMAD:** Haddi ay **xaaladaada caafimaad ay aad u liidato** (oo laga soo xaqiijisay xarun caafimad ama rug la dhiganta),taas oo kugu haysa dhib aan laga soo kabsan karin haddi aad ku laabatid waddankada, waxaad codsan kartaa ogoolaansho joogitaan **baaritan caafimad** oo ka asxansan oo keliya dhulka Talyaaniga mudada aad ku jirtid daryeelka (joogitaan ugu badnaan **1 sano**), markuu dhaco ogoolaanshahan joogitaan waa la **cusbooneyn** karaa adigoo soo gudbinaaysid dokumentiga caafimad oo muujinaaya baahida loo qabo in la sii wado daweeynta. Xataa **haweenka uurka leh** waxay xaq u leeyihiin ogoolaansho joogitaan daryel caafimad darteed oo ansaxsan ilaa iyo lixda billod oo ku xigta dhalashadda ilmaha.

**2. OGOOLAANSHO MASIIBO DARTEED :** Haddi aad waddankada ad ku noqon karin si nabad ah, massibo darteed sidda dhul gariir ama roobab, waxad xaq uu leedahay ogoolaansho joogitaan 6 **bilood ah** oo ka ansaxsan oo keliya dhulka Talyaaniga. **Markay dhaco ogoolaanshahan waa la** cusbooneysiin kara ilia 6 bilood oo kale haddi waddankadii aad ka soo jeeday uu weli aheeyn nabad sababaaha dartood, ogoolaanshahaan waxuu xaq ku siinayaa inaad shaqeeyso laakiin ma u beddeli kartid ogoolaansho joogitaan shaqo.

**3. OGOOLAANSHO KIISAS KHAAS AH:**

**a)** haddi aad tahay dhibane la xoogay, ama laga faa'idaystay, waxaa xaq u leedahay ogoolaansho joogitaan oo 6 bilood ah oo la cusbooneysiin karo ilaa iyo 1 sano (ila iyo inta wakhti aa lo banan yahay sababaha cadaaladda ama haddi ay jirto shaq socotay. Ogoolaanshahaan waxaad xaq u leedahay inaad wax baratid isku qortid liiska xaririinta shaqadda , in aad shaqaaysid, isku qortid adeegyada

soo dhaweeynta ( soo dhaweeyn xafidan, caawinaad nafsi iyo bulsho).
**b)** haddi aad tahay dhibane guriga lagu dilo, waxad xaq u leedahay ogoolaansho joogitaa mudadiisu ay tahay **1 sano** oo lo bedeli karo sababo waxbaarasho ama shaqo ogoolanshaqqan waxuu xaq kuu siinayaa in aad hesho adeegyadda cawinadda (soo dhaweeynta xafidan, cawiinad maskaxiyeed iyo bulsho) iyo xaq waxbarasho iyo shaqo.
**c)** Haddi aad taha dhibane looga faa'iideysto shaqo, waxaad xaq u leedahay **ogoolaansho joogitaan** 6 bilood, la cusboonaysiin karo ilaa iyo 1 sano ama in ka badan haddi ay jiraan baahiyo cadaaladeed. Ogoolaanshaqaan waaxuu kuu fasaxaa in aad ku shaqayn kartid,oo loobadali karo ogoolaansho joogitaan sababo shaqo.

Sidoo kale soo jeedinta Guddomiyaha Sare iyo ogoolansha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaa lagu siin karaa ogoolaansho joogitaan haddii aad hirgelisay " **Fal qiimo u leh bulshadda** " (tusaale ahaan : haddi aad badbaadisay dad ku sugnaa halis, aad ka hor tagtay masiibo, aad suubisay ficil ku wanaagsaan baniaadanka, aad kor uu qaaday magaca iyo sharafta Talyaaniga, iwm ) . noocan ogoolaansho joogitaan waa muddo **2 sano** ah oo la **cusbooneeysin karo**, waxaad xaq uu leedahay in aad wax baran karto ama aad shaqayn kartid, ogoolaanshahaan joogitaan waxaa loo badali karaa mid ogoolaansho joogitaan sababo shaqo.

*la xariir sharci yaqaan si aad u heshoo macluumaadka ku saabsan waxaa loo baahan yahay iyo nidaamka codsashadda noocyadda kala duwan ee ogoolaanshada degganaanshada.*

# 8. CINWAANADDA IYO LAMBARRO MUHIIM AH

## LAMBARADDA DEG-DEGGA AH :

SOS

**112 Halista deg-degga ah**
(Amniga guud, Dab damis, gargaar deg-deg ah)

**118 Caafimadka deg-degga ah**

Waa lambarro lacag la'aan ah, shaqeeya 24 saac oo leh shaqaale ku hadla luuqado badan .

## UNHCR,
## Haya'adda qaramaha midoobay ee qaxootiga

Via Leopardi 24, 00185 Roma
**Tel.** +39 06 802121
**Webseedka :** https://www.unhcr.it | **email :** itaro@unhcr.org

**faahfahino kale iyo wakhtiyadda ay furan tahay kala soco :** https://www.unhcr.it/chi-siamo/contatti

## OIM,
## Ururka caalamiga ah ee socdaalka

Xafiiska cawiinadda laabashadda iskaa ah iyo dib u dhexgalka bulshadda
Via Nomentana 201, 00161 Roma
**Tel.** +39 06 4416091 **nambar cagar : 800 2000 71**
**Webseedka :** http://www.italy.iom.int | **email:** ritorno@iom.int

## Juma Refugees Map Services waa adeeg khariidad ah oo ay adeegsadaan Qaxootiga waxaa suubiyay ARCI iyo Taageeradda UNHCR

**Lacag lacagta ah ee loogu talagalay Codsiyada iyo Ka faa'iideystayaasha caalamiga ah iyo ilaalinta Bani'aadanimada 800 905 570**

**Webseedka :** https://www.jumamap.com/

*Webseedka ( waxuu ku qoran yahay luqaadaha: talyaani, fransis, ingiriis, carabi iyo shiines) , waxaad si fudud uga heli kartaa ciiwanadda uruuradda kaa caawini karo soo dhaweeyn, daryeel caafimad, , skool talyaani, maamul iyo sharci, hagid shaqo, cawinad nafsi/bulsho,iyo xarumaha ka hortagga xadgudubka/kufsiga jinsiga oo ku yaal Talyaaniga oo dhan.*

## Lambarka Cagaarka oo ka hortagga dad ka ganacsiga/muqalas :

Guddomiyaha Golaha Wasiirrada Waaxda u Sinaanta Fursadaha
**Lambar cagaar - 800 290 290**

*oo shaqeeya 24 saac maalinti, maalin kasta sannadka oo dhan, sir ah, aan magac lagu weydineeyn oo leh shaqaale ku hadla luuqado badan.*

## Lambarka Qaran ee ka hortagga Xadgudubka/Kufsiga iyo dabasocodka

Guddomiyaha Golaha Wasiirrada Waaxda u Sinaanta Fursadaha
**Tel. 1522**

*oo shaqeeya 24 saac maalinti, maalin kasta sannadka oo dhan, lacag la'aan, oo leh shaqaale ku takhsuusay ka hortagga xadgudubka iyo kufsiga jinsiga.*